Somaliland Societies in Europe
Connecting Somaliland Communitites

**Ref: SSE/DK-84/26062019**

**Taariikh: 26 June 2019**

# SSE- WAR-SAXAAFADEED
## Sanadguurada 59aad ee Xorriyadda Somaliland

**Hambalyo 26ka June 2019**

1. Dalladda guud ee Jaaliyadaha Somaliland ee Europe (SSE) waxay dhammaan ummada Jamhuuriyadda Somaliland ee ku sugan dalka iyo dibeddaba u direysa hambalyo sannadguuurada 59aad ee maalintii 26ka June 1960 kii ee Somaliland xorrowday, ayna dhashay **Qaranka Somaliland (State of Somaliland).** Ilaa iyo intii uu qarankaasii dib u dhashay mar kale 18kii May 1991kii isaga oo ah **Jamhuuriyadda Somaliland**, labadaas cisho ee 26ka June iyo 18ka May waa maamlaha qaranka ee la xusso, iyago labaduba ay yihiin dhibidbadii xorriyadda, qarannimada iyo israacsanaanta dhul-ahaaneed ee shacabka iyo dalka Somaliland. Labadaas maalmo qaran ee xorriyad helintii iyo la soo noqoshadeedii ka dib markay luntay waa lamaane aan la kala saareyn.

2. Waxaa la yaab leh in xukuumadaha Somaliya loo dhisay ay qabtaan xaflado caweys oo ku saabsan 26ka June oo aanay ku xusin xorriyadda Qaranka Somaliland oo ay ku tilmaamman xaqiirnimo ‘Gobollada Waqooyi’, ee ay ku xusaan in calankoodii ay sameysteen 1956kii laga taagay Hargeisa. Calankaas waxaa loo taagay himilida markaas ee doonista midowga shanta dal ee qowmiyadda Soomalidu ka deggan tahay Geeska Afrika. Laakiin 26 June 1960kii waa ka weyned calan saar keli ah, waxaananu war saxaafadeekan (iyo qoraalo kale oo fidsanba) ku xusaynaa muhimaddeeda iyo dhaxalgalkeeda.

**Dalka iyo Dadka Somaliland**

3. 26 June 1960kii waxay soo dhameystirmay dalkii maxmiyadda BIritishka ee Somaliland oo la abuury 1880taneeyadii. Ee ay qaybsadeen Biritishka iyo quwadihii kale ee Europe iyaga oo raacayay habkii qaybsiga dhulka Afrika ee Shirkii iyo Xeerkii Berlin oo gaar ahaan ku saleysnaa aagagii xeebaha (coastal areas) ee mid kastaaba qayb sheegtay, waxay Biritisku July 1887 heshiishyo ay la galeen beelaha xeebaha ee Somaliland. Waxayna meel kasta ku heshiiyeen quwadahaasi baaxada ama xuduudaha ka dhaxeyn doona, waxay gumeysigoodi ku fidiyeen dhammaan goobihii kale ee dalka gudihiisa oo dhan ha ahaado maxmiyad (protectorate ) ama dhul la qabsaday. Waxay isticmaaleen awooddooda iyo xeerarkooda ay sameysteen. Biritishku waxay Somaliland ahaan, arrimahaas kula heshiiyeen Fransiika iyo Talyaaniga iyo Itoobiya. Waxayna soo saareen sharciyo ay ku sheegayaan dhammaan dalka Somaliland oo ay maxmiyad ahaan giddigeed u hayaan iyagoo adeegsanaya heshiisyo iyo ogolaansho u fasaxaya isticmaalid, si haysasho iyo siyaabo kale oo sharci ah (treaty, grant, usage, sufferance, and other lawful means). Waxaanaynu taariikhdan usoo qaadanay in dhammaan dadkii maxmiyaddii Somaliland lagu tiriyo (‘colonial protectorates’), kuwa beel ahaan saxeexay heshiisyadii 1880s, iyo

kuwa kaleba ay u ahaayeen ummada maxmiyadda Somaliland. Maalintii 26 June 1960kii oo uu hirgalay Xeerka Jinsiyadda Qaranka Somaliland, dhammaan yeesheen jinsiyada Somaliland, ummadda Somaliya sidaas oo kale ayay Xeer jinsaydoodda u sameysteen.

**Qaranka Somaliland (State of Somaliland) 1960**

4. Qarankii xorta ahaa ee Somaliland ee dhashay 26kii June 1960kii wuxu lahaa dhammaan astaamaha qaran iyo madaxbanaani dal dhisan oo ku saleysan:
   - Distoorka Somaliland oo hirgaly 26kii June 1960, caddeynayana dhulka qaranka oo ahaa kii loo yaqaannay Maxmiyadda Somaliland (Qod. 2). Waxa kale oo loo dajiyay saddexda waaxood ee qaranka oo kala ah – Fulinta (oo ka koobnaa Golaha Wasiirrada oo uu madax u yahay Raiisul Wasaare, oo ahaa markaas Mohamed Ibrahim Egal), Xeerdejinta (oo la doortay Feberwari 1960), iyo Garsoorka.
   - Xeerka Jinsiyadda Somaliland oo hirgalay 26kii June 1960.
   - Qaranka oo lahaa Ciidan Military, Ciidan Boolis, Ilaalo, Ciidan Xabsiyada, iyo Shaqaale Dawladeed oo hufan.

5. Sida dalalka kale ee ka xorroobay gumeysiga, madaxbannaanida Somaliland waxa 26 June 1960 hambalyeeyay oo soo dhaweeyay dal ahaan 30neeyo dal. Isweydaarsi diploomasiyiin may suurta gelin waqtigaas oo way gaabneyd muddada ay Somaliland gooni u taagneyd, waxaana markaas lagu jirey hawsha in la midoobo Somaliya. Hase yeese, taasi waxba uma dhibin qarannimadeeda gaaban, waxayna heshiisyo caalami ah la gashay UK muddadaas.

**26 June 1960 Aayaheeda**

6. In kastoo israacii Somaliya ee degdega ahaa ee aan la qorsheyni uu madax bannaanadii Somaliland lumiyay, haddana aayaha 26 June waxaa ka mid ah:
   - Xudduudaha Somaliland oo dhaliil kasta ha la haadeene weli tagan, iyado kan Somaliya lala lahaa uu isu beddalay xad maamul oo ilaa hadda xarriiqdiisu muuqato, marka laga reebu in yaroo wax ka bedellay taliskii militarigu xuduudkaas sidii lagu heshiiyay, wuu sii jiray waayo xeerarka, goob doorashooyinka, cashuuraha iwm Somaliland iyo Somaliya ilaa 70yadii way kale duwanaayeen, ka dibna gobollada iyo degmooyinka xadka sidaas ayuun bay u jireen.
   - In kastoo dadka Somaliland ay qowmiyadda Soomalida ka mid yihiin, waxaa weli u gaar ah 'rer Somalilannimmada' oo ah astaan ummadeed (national origin) o sharciga la yaqaan kuna saleysan ummaddii isku dal iyo qaran aheyd ilaa qarnigii 19aad. Midowgii Somaaliya ma saameyn astaantaas.
   - Dadka Somaliya oo qaarkood laga dhaadhiciyay in gobolo ay midowbeen ama dal la yidhaahdo 'Somalia' gumeystihii kala qaybiyay, 26 June waxay u sheegeysaa in laba dal oo xor ah ay midowbeen.

7. Xorriyad la helo lama iloobo, markay si sibiq ah gacantaada uga baxdana kaba sii daran. Xorriyaddeennii 26 Juun waxaynu damacnay inaynu u sidqayno riyo aan rumoobaynin. 18 May baynu soo noolaynay, qiimahay innoogu fadhido sideen ku illownaa? Weligeed dhici mayso inay mar kale dhalanteed innooga baxdaa.

**Somaliland Guul**
**Gudidda fulinta dalada (Somaliland Society in Europe) SSE**
**Tel. 004571664659**
**Contact email : ssediaspora@gmail.com**